IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 7aad Muqdisho 1 Nofembar 1979 L. 11**

***FAAFINTA BIL SOO BAXA*** جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

*QIIMUHU : waa 5 shilin lambar waliba RUKUNKA : Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadana waa Sh so. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta*

*K O O B N I I N*

*Q A Y B T A  K O O W A A D*

**SHARCI**

SHARCI L. 36 ee 24 Sebt. 1979, Meel marin heshiis; Bogga 560

LAW N. 36 on 24 Seb. Instrument of Ratification » 561

SHARCI L. 37 ee 24 Sebt. 1979 Meelmarin Heshiis » 562

LAW N. 37 on 24th Set. 1979, Instrument of Ratification. » 563

SHARCI L. 38 ee 24 Sebt. 1979, Meelmarin Heshiis » 564

LAW N. 38 on 24th Set. 1979, Instrument of Ratification. » 565

SHARCI L. 39 ee 24 Sebt. 1979, Meelmarin Heshiis » 566

## SHARCI LAMBAR 43 TAARIIKH 1. 12. 1979

Doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee Degaanka.

**MADAXWEYNAHA JDS**

MARKUU ARKAY : **Qod 113/2, 72, 61 iyo 95 ee Dastuurka;**

ISAGOO TIXGELINAAYA : **Go'aanka Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed**

**WUXUU SOO SAARAY**

**Sharciga soo socda :**

### XUBINTA I
### TILMAAMO GUUD

**Qod. 1aad**
**(Habka iyo siyaabaha Doorashada**

1) Sharcigan wuxuu nidaaminayaa habka iyo siyaabaha doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee degaanka, waxaana lagu dabbiqi karaa xaaladda doorashooyinka lammaan iyo xaaladda doorashooyinka kala soo [illegible]ba.

2) Haddii aaney jirin kala duwid la muujiyey oo loogu tala galay xaalba g[illegible]kiisa, Sharcigan waxaa lagu dabaqayaa labada h[illegible] doorasho ee lambarka hore ku xusan.

**Qod. 2aad**
**(Muddada Xilka)**

1) Sida ku tilmaaman Qod. 62 lambarka 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, muddada xilka Golaha Shacbigu waa shan sano, laga billaabo maalinta la soo saaro natiijada doorashada.
2) Golaha Shacbigu wuxuu isu imanayaa qaanuun ahaan

maalinta soddonaad laga bilaabo maalinta la soo saaro natiijada doorashada, haddii ayan Madaxweynaha Jamhuuriyadda, baahi Qaran ee degdeg ah awgeed, la noqon mid habboon in Golaha Shacbigu taariikhdaas ka hor isu yimaado.

3) Muddada xilka Golayaasha Shacbiga ee Degaanku waa shan sano laga bilaabo maalinta la soo saaro natiijada doorashada.

**Qod. 3aad**

**Xildhibaannada la doorto iyo Xubnaha Golayaasha Shacbiga ee Degaanka)**

1) Tirada Xildhibaannada la doorto ee Golaha Shacbigu waa 171.

2) Tirada Xubnaha Gole Shacbi degaan kasta waxay ku tilmaaman tahay lifaaqa Sharcigan.

**Qod. 4aad**
**(Qofka wax dooran karaa)**

1) Waxaa wax dooran kara Muwaadin kasta oo:
a) ugu yaraan siddeed iyo toban jirsaday sannadka la qabanayo doorashooyinka;

b) Garsoorku ku caddeyn waalli;
t) Sharcigu ka xaaraantimeyn qabasho xilal guud, lagana qaadin xuquuqda doorashooyinka xukun ciqaab awgiis;

j) ku sugneyn xabsi xukun maxkameed awgiis.
2) Doortuhu wuxuu nooc kasta ee doorasho xaq u leeyahay hal cod qur ah.

3) Codku waa shakhsi, xor, toos, qarsoodi waana loo siman yahay.

4) Doortayaashu waxay codkooda ku dhiiban karaan goobta ay ku sugan yihiin maalinta doorashada.

**Qod. 5aad**
**(Qofka la dooran karo)**

1) Waxaa loo dooran karaa xilka xildhibaannimada ama xubin Gole Shacbi ee degaan muwaadin kasta oo:
a) kow iyo labaatan jirsaday sannadka la qabanayo doorashooyinka;
b) wax qori kara akhriyi karana;
t) waddaninimadiisu sugan tahay;
j) ka fayow iimaha qabiilka, goboleysiga, danaysiga;
x) ku caan bixin ka hor imaadka danaha Dadweynaha;
kh) u hoggaansan Siyaasadda Kacaanka, Xeerka iyo Barnaamijka Xisbiga.

**Qod. 6aad**
**(Qabashada Doorashooyinka)**

1) Doorashooyinka Golaha Shacbiga iyo kuwa lamaan ee Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee Degaanka waxaa lagu sheegayaa Xeer Madaxweyne.

2) Xeerarka doorashooyinka lagu sheegayaa waa inay tilmaamaan taariikhda doorashada.

**Qod. 7aad**
**(Soohdimaha Doorashada ee Dhulka)**

1) Marka laga eego dhanka doorashada Golaha Shacbiga, Dhulka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa uu ka kooban yahay hal soohdin doorasho.

2) Marka laga eego dhinaca doorashada Golayaasha Shacbiga ee degaanka, Dhulka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya wuxuu u qaybsamayaa soohdimo doorasho ee degmo, oo mid kasta ku jaan go'an tahay dhulka degmada.

3) Soohdin kasta waxay u sii qaybsamaysaa goobo doorasho oo u taagan doorashada Xildhibaannada Golaha Shacbiga, ama doorashada Golayaasha Shacbiga ee degaanka ama wadajir labada doorashaba.

4) Goobaha doorashada waxaa lagu dhisayaa go'aanka Guddiga Qaranka ee doorashada iyadoo la raacayo talada Xoghayeyaasha Guddiyada Xisbiga ee Degmooyinka, ugu yaraan labaatan maalmood ka hor maalinta doorashada.

### Qod. 8aad
### (Sharraxaadda)

1) Sharraxaadda Xildhibaannada Golaha Shacbiga iyo Xubnaha Golayaasha Shacbiga ee degaanka, waxaa leh Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

2) Doorashooyinku waxay ku soconayaan HAB HEER QARAN AH OO ISKU DUUBAN.

3) Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu soo bandhigayaa laba liis oo ay ku kala qoran yihiin musharrixiinta Golaha Shacbiga iyo kuwa Golayaasha Shacbiga ee degaanka.

4) Liiska Golaha Shacbiga wuxuu yeelanayaa musharrixiin keyd ah oo tiradoodu tahay ilaa labaatan qof.

5) Liiska Gole Shacbi ee degaan kasta wuxuu yeelanayaa musharrixiin keyd ah oo tiradoodu tahay shan qof, marka laga reebo Golaha Shacbiga ee magaalada Xamar oo yeelanaya 10 qof oo kayd ah.

6) Habka doorashadu waa «HAA» iyo MAYA» oo loola jeedo liiska musharrixiinta oo idil.

7) Xaaladda doorashada lammaan, doortuhu hal cod qur ah ayuu dhiibanayaa oo si wadajir ah uu ku oggolaanayo ama ku diidaayo musharrixiinta Golaha Shacbiga iyo musharrixiinta Golaha Shacbiga ee degaanka.

8) Doorashadu waxay ku ansaxaysaa haddii aqlabiyadda doortayaashu ku cod bixiyaan «HAA».

9) Haddii aqlabiyadda doortayaashu ku cod bixiyaan «MAYA» waa in doorasho kale ee cusub la sameeyaa lix bilood gudahood.

## XURINTA II
## BANDHIGIDDA DADKA SHARRAXAN

### Qod. 9aad
### (Liiska musharrixiinta)

1) Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu liiska musharrixiinta Golaha Shacbiga iyo musharxiinta Golayaasha Shacbiga ee degaanka iyo keydkoodaba u soo gudbinayaa Guddiga Qaranka ee doorashada ugu yaraan labaatan beri ka hor maalinta doorashada.

2) Liisaska musharrixiinta waa inay tilmaaman ka bixiyaan dadka sharraxan magacyadooda saddexan, naanaystooda, magaca hooyada iyo sannadka dhalashada.

3) Liiska waa in lagu soo lifaaqaa caddeyn uu qoray, saxiixayana musharraxu, kuna muujinayo in uu oggolaaday sharraxaadaas, shan maalmood gudahood.

4) Musharraxa dalka dibaddiisa ku sugan caddeynta oggolaanshaha sharraxaadda ee lambarka hore ku xusan, wuxuu ku soo gudbin karaa taar, isagoo soo marinaya hay'adda dibloomaasiga ee Jamhuuriyadda ugu dhow, todoba maalmood gudahood.

### Qod. 10aad
### (Bandhigidda Liiska Musharrixiinta)

1) Guddoomiyaha Guddiga Qaranka ee Doorashadu, waa in uu degmo kasta u gudbiyaa liiska musharrixiinta Golaha Shacbiga iyo liiska musharixiinta Golayaasha Shacbiga ee degaanka toban maalmood ka hor maalinta doorashada.

2) Xoghayeyaasha Guddiyada Xisbiga ee Degmooyinku waa in ay liisaskaas u bandhigaan dadweynaha, iyagoo ku dhejinaya looxyada ogeysiiska Degmada iyo meelihii kaloo ku habboon ugu yaraan toban maalmood ka hor maalinta doorashada.

## XUBINTA II
## GUDDIYADDA DOORASHADA

### Qod. 11aad
### (Hay'adaha Doorashada)

**Hay'adaha doorashadu waa :**

a) Guddiyadda doorashada ee goobta;
b) Guddiyada Doorashada ee Degmada;
t ) Guddiga Dhexe ee doorashada.

### Qod. 12aad
### (Guddiyada Doorashada ee Goobta)

1) Guddiyada doorashada ee goobtu waxay ka koobmaan: Guddoomiye iyo laba kaaliye oo kan ugu da' weyn noqonayo Guddoomiye ku-xigeen.

2) Guddi doorasho goob kasta wuxuu yeelanayaa hal xoghaye.

3) Guddoomiyaha, labada kaaliye iyo Xoghayaha waxaa laga dhex magacaabayaa dadka xaqa u leh codbixinta.

4) Xubnaha Guddiga iyo Xoghayaha waxaa magacaabaya, beddelayana marka loo baahdo, Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka isagoo dhageystay Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada.

5) Marka ay timaaddo baahi deg deg ah, lagama maarmaanna ay noqoto, inta codbixintu socoto, beddelaadda Kaaliyayaasha ama Xoghayaha, Guddoomiyaha ayaa ku beddelayaa qof kale oo leh sharuudaha Sharcigu tilmaamay.

### Qod. 13aad
### (Guddiyada Doorashada ee Degmada)

1) Guddiga doorashada ee Degmada rugtiisu waa magaala madaxda degmada.

2) Guddigu wuxuu ka koobmaa Guddoomiye iyo laba kaa-

liye kan ugu da'weyn noqonaayo Guddoomiye ku xigeen.

3) Guddiga Doorashada ee Degmadu wuxuu yeelanayaa hal Xoghaye iyo laba qof oo u qaybsan tirada.

4) Guddoomiyaha, Kaaliyayaasha, Xoghayaha iyo u qaybsanayaasha tirada waxaa laga dhex magacaabaya, dadka xaqa u leh codbixinta, waxaana magacaabaya, beddelaayana marka loo baahdo, Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka, isagoo dhegeystay Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee degmada.

**Qod. 14aad**
**(Guddiga Dhexe ee Doorashada)**

1) Guddiga Dhexe ee Doorashada rugtiisu waa Muqdisho, wuxuuna ka koobmaa Guddoomiye, Guddoomiye ku-xigeen iyo saddex Kaaliye.

2) Guddigu wuxuu yeelanayaa hal Xoghaye iyo saddex qof oo u qaybsan tirada.

3) Guddiga Dhexe ee Doorashada waxaa Guddoomiye u ah la-taliye ka tirsan Maxkamadda Sare.

4) Guddoomiyaha, Guddoomiye ku xigeenka, Kaaliyeyaasha, Xoghayaha iyo u qaybsanayaasha tirada waxaa magacaabaya, marka loo bahdana bedelaya, Guddoomiyaha Guddiga Qaranka ee Doorashada, waxaana laga dhex xulayaa dadka xaqa u leh codbixinta..

**Qod. 15aad**
**(Magacaabidda iyo Dhaarta Xubnaha Guddiyada Doorashada)**

1) Magacaabidda Xubnaha Guddiyada doorashada waa in la sameeyaa, lana gaarsiiyaa dadka ay khuseyso, ugu yaraan toban maalmood ka hor taariikhda codbixinta.

2) Qofna ma diidi karo xilka loo magacaabay haddii aysan jirin sabab cad oo la garawsan karo. Ka cafiska waxaa awood u leh hay'addii lahayd magacaabidda Xubinta.

3) Inta uusan xilka qaban, xubin kasta oo ka mid ah Guddiga doorashada ee goobta ama degmada wuxuu ku marayaa, Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada hortiisa, dhaarta soo socota :

**«WAXAAN MAGACA ILAAHAY KU MARAYAA IN AAN XILKA LA II DHIIBAY EE LA XIRIIRA DOORASHADA KU GUTO NIYADSAMI, DAACADNIMO, SI BUUXDANA U DHOWRO DASTUURKA, SHARCIGAN IYO SHURUUCDA KALE EE DALKA».**

4) Xubnaha Guddiga Dhexe ee doorashada waxay dhaartaas oo kale ku marayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare hortiisa.

### Qod. 16aad
### (Xaaladda Qaanuuneed ee Xubnaha Guddiyada)

1) Xubnaha Guddiyada Doorashada oo idil waxaa loo aqoonsanayaa, inta ay wadaan hawlaha doorashada, Saraakiil Qaran.

2) Waxaan xilkaas qaban karin Xoghayeyaasha Guddiyada Xisbiga ee Gobollada iyo Degmooyinka iyo Musharrixiinta.

## XUBINTA IV
## HAWLAHA GOGOLDHIGIDDA

### Qod. 17aad
### (Qalabka Doorashada)

1) Guddiga Qaranka ee Doorashadu wuxuu u diyaarinayaa guddi doorasho goob kasta qalabka soo socda :-

a) Hal nuqul oo ah Sharcigan;

b) Koley ningaxan oo ay ku jiraan shaabadda Guddiga Doorashada goobta, khad iyo khadeeye;

t) Koley ningaxan oo ay ku jiraan xaashiyaha codbinta;

j) sanaadiiqda codbixinta;

x) saddex nuqul oo ah diiwaanka hawlaha guddiga doorashada goobta;

kh) Shan xabbo oo ah halku-dhegyo dadweynaha loogu tilmaamayo habka codbixinta;

d) hal dhalo oo ah khadda aan tirmeyn;

r) qalab xafiis iyo wixii kale ee lagama maarmaan ah.

2) Guddiga Qaranka ee doorashadu wuxuu kaloo u diyaarinayaa Guddiga Dhexe iyo Guddiyada degmada ee doorashada qalabka soo socda :-

a) hal nuqul oo ah Sharcigan;

b) Koley ningaxan oo ay ku jiraan shabadda Guddiga doorashada, khad iyo khadeeye;

t) Saddex nuqul ooah diiwaanka hawlaha guddiga doorashada;

j) qalab xafiis iyo wixii kale ee lagama maarmaan ah.

3) Qalabka guddiyada doorashada loogu tala galay waxaa lagu ururinayaa saxaarad gaar ah oo Guddiga Qaranka ee Doorashadu waqti habboon ku gaarsiin doono, iyagoo xiran, ningaxan, lana socdaan sanaadiiqda codbixinta, Xoghayeyaasha Guddiyada Xisbiga ee Degmooyinka.

4) Qalabka u socda Guddiga Dhexe ee doorashada waxaa toos u gudbinaya Guddiga Qaranka ee doorashada.

5) Isla mar ahaantaas Guddiga Qaranka ee doorashadu, wuxuu u dirayaa Xoghayeyaasha Guddiyada Xisbiga ee Degmooyinka, iyagoo ku jira koley ningaxan, tiro ku habboon oo ah xaashiyo codbixin keyd ah, looguna tala galay in la siiyo Guddiyada Doorashada goobaha kaddib marka laga helo Guddoomiyaha Guddiga codsi sababaysan.

6) Haddii ay jirto dhibaato gaar ah xagga isgaarsiinta, Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu wuxuu ku aamini karaa hal wakiil ama ka badan qayb ka mid ah xaashiyaha codbixinta kaydka ah, iyagoo ku jira koleylo xiran oo ningaxan. Wakiilladu waxay xaashihaas diyaar ula ahaanayaan Guddoomiyeyaasha Guddiyada doorashada ee goobaha ku yaal meelaha ka fog xarunta degmada.

## Qod. 18aad
## (Shaabadda, Diiwaannada iyo Sanaadiiqda)

1) Shaabadaha Guddiyada Doorashada, Diiwaannada iyo sanaadiiqda codbixinta waa isku nooc Dalka oo idil.

2) Shaabaduhu waxay leeyihiin lambar mideysan oo ku socda tiro taxaan.

## Qod. 19aad
## (Xaashiyaha codbixinta)

Xaashiyaha codbixinta waxay ka sameysan yihiin warqad cad oo bolletooyin laga jari karo ku dhegan, midkiibana boqol xaashi ku yaalliin. Cadka ku haraya bolleetada wuxuu leeyahay lambar u gaar ah oo ku socda tiro taxan.

## Qod. 20aad
## (Ilxirrada iyo Sanaadiiqda Codbixinta)

1) Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu waa inuu ka diyaariyaa goob doorasho kasta laba ilxir. Ilxirradu waa inay u samaysnaadaan si kafaala qaadaysa qarsoodiga codbixinta.

2) Ilxir kasta waa in la dhigaa laba sanduuq oo mid buluug xiddig cad leh yahay, looguna tala galay in lagu rido xaashiyaha codbixinta ee oggol musharrixiinta, kan kalena uu hurdi yahay looguna tala galay in lagu rido xaashiyaha codbixinta ee diidan musharrixiinta.

3) Sanduuqa buluugga ah dushiisa waa in lagu dhigaa «HAA», kan hurdiga ahna «MAYA».

## Qod. 21aad
## (Tilmaamidda Habka Codbixinta)

1) Nuqul ah halkudhegga ku xusan Qod. 17, lambar 1, xarafka kh), waa in lagu dhejiyaa meel laga arki karo, gudaha iyo dibadda goobta. Sidoo kale waa in lagu dhejiyaa ilxir kasta gudihiisa meel codbixiyuhu ka arki karo.

2) Isla habkaas waa in loo bandhigaa, gudaha iyo dibadda ilxir kasta, liisaska musharrixiinta.

### Qod. 22aad
### (Gaarsiinta Qalabka Guddiyada Doorashada)

1) Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu waa in uu lixda subaxnimo ka hor maalinta doorashada gaarsiiyaa qalabka doorashada guddi-doorasho goob kasta, kuna dhiibaa goobta Guddigu mas'uulka ka yahay.

2) Sidoo kale Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu waa in uu dhiibaa, inta ka horreysa 4ta galabnimo ee isla maalintaas, qalabka u socda Guddiga doorashada ee Degmada.

3) Wuxuu kaloo guddi doorasho kasta gaarsiinayaa nuqul ah warqadda magacaabidda xubnaha Guddiga.

## XUBINTA VI
## Codbixinta

### Qod. 23aad
### (Dhisidda Guddiga Doorashada ee Goobta)

1) Guddoomiyaha Guddiga doorashada ee goobtu, markii uu helo qalabka ku tilmaaman qodobka hore, wuxuu :-

a) ku dhaqaaqayaa dhisidda Guddiga isagoo u yeeraya in ay ka soo qayb galaan kaaliyayaasha iyo Xoghayaha;

b) kaddib markuu hubsado, tusana Xubnaha kale dhammida ningaxa saaran, wuxuu furayaa saxaaradda, wuxuuna hubinayaa qalabka ku jira;

t ) furayaa koleyada ay ku jiraan shaabadda Guddiga iyo xaashiyaha codbixinta kaddib markuu hubiyo, tusana xubnaha kale, dhammida ningaxa saaran koleyadaas. Xaashiyaha Codbixinta wuxuu ku dhufanayaa shaabadda goobta;

j ) hubinayaa sanaadiiqda codbixintu in ay maran yihiin kaddibna waa uu xirayaa, ningaxayaana isagoo u dhaafaya keliya daloolka looga ridayo xaashida codbi-

xinta;

x) dhejinayaa halkudhegyada tilmaamaya habka codbixinta;

kh) dhejinayaa liisaska musharixiinta;

d) hubinayaa in qalabka codbixinta loo nidaamiyey si hawlaha doorashadu habsami ugu socon karaan;

2) Hawlaha kor ku xusan waxaa lagu qorayaa diiwaanka, iyadoo la tilmaamayo lambarka u gaarka ah shaabadda guddiga doorashada ee goobta iyo tirada xaashiyaha codbixinta loogu talo galay doorashada.

3) Hawlahaasu marka ay dhammaadaan, Guddoomiyuhu wuxuu ku dhawaaqayaa furitaanka codbixinta.

**Qod. 24aad**

**(Awoodda ilaalinta nabadgelyada ee Guddoomiyaha)**

1) Guddoomiyaha Guddiga doorashada ee goobta wuxuu xilsaaran yahay ilaalinta nabadgelyada hawlaha doorashada, wuxuu adeegsan karaa Ciidammada nabadgelyada si loo fogeeyo ama loo xiro qofkii dhibaato u geysanaya habsamida hawlaha doorashada.

2) Ciidanka Nabadgelyadu wuxuu ku geli karaa goobta idanka Guddoomiyaha oo keliya.

3) Hawlwadeennada Hey'adaha Dawladda iyo Taliyayaasha Ciidammada Nabadgelyadu waxay fulinayaan awaamiirta Guddoomiyaha si loogu suurtageliyo doortayaasha gelitaanka goobta, loogana ilaaliyo agagaarkeeda hor dhoobasho sabab la'aan ah.

4) Awoodaha kor ku xusan kuwo la mid ah waxaa leh Guddoomiyayaasha Guddiyada doorashada degmada iyo Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee doorashada.

**Qod. 25aad**

**(gelitaanka goobta)**

1) Xubnaha Guddiga ka sokow, goobta waxaa geli karaa oo keliya qofka leh xaqa doorashada.

2) Codbixiyayaashu waxay u gelayaan mid mid iyagoo isku xigsanaya sida ay u soo kala horreeyeen. Hase yee-

shee waxaa hormarin leh qof kasta oo haya xil la xiriira hawlgelinta doorashada.

3) Codbixiyayaashu lama soo geli karaan hub ama qalab kale oo wax dhibi kara.

**Qod. 26aad**
**(Oggolaashaha codbixinta)**

1. Codbixiye kasta wuxuu codbixin karaa kaddib:
a) Markii uu caddeeyo magaciisa oo dhan iyo da'diisa;
b) Guddigu u aqoonsado in uu yahay qof leh xaqa codbixinta. Go'aankaas guddigu wuxuu ku gaarayaa hab gaaban iyo si degdeg ah iyadoo la tixgelinayo qaarallo, markhaati iyo wixii kale oo cadayn waxtar leh ah.

2. Gacanta bidixda, ama haddii aysan jirin, tan madigta, amaba, haddii labaduba maqan yihiin, meel kaloo la arki karo oo jirkiisa ka mid ah, waa in calaamad muuqata oo ah khadda aan tirmin laga mariyaa Codbixiyaha inta aan la siin xaashida codbixinta.

Qod. 27aad
**(Doortayaasha aan codbixin karin qof ahaan)**

1. Waxaa cod baxsanaya qofkii xaq u leh ee yimaada qof ahaan goobta doorashada.

2. Qofka, iin jir oo ka muuqata awgeed, aan cod bixin karin, wuxuu Guddoomiyuhu u ogglaanayaa inuu kaalmeeyo qof kale uu codbixiyuhu ku kalsoon yahay.

3. Xoghayuhu waa inuu ku qoraa diiwaanka, isagoo tiimaamaya sababta loogu oggolaaday, magaca qofkaas iyo kan kaalmeeyey.

**Qod. 28aad**
**(Habka Codbixinta)**

1. Marka ay dhammaadaan hawlaha ku xusan Qod. 26aad, Guddoomiyuhu wuxuu mid mid ugu dhiibayaa qof kasta oo codbixinaya hal xaashi codbixin oo shaabaday-

...loogana soo jaray bolleetada sida ay isu lambar-...o xigaan.

2. ...ibixiyuhu wuxuu la aadayaa ilxirrada codbixinta loo ...eeyey midkood.

3. ...aka oggolaashaha musharrixiinta, labada doorashaba, waxaa loo dhiibanayaa xaashida codbixinta oo lagu rido sanduuqa Buluugga ah, kan diidmadana sanduuqa Hurdiga ah.

4. Haddii codbixiyuhu arko in xaashida la siiyey xun tahay ama ayan dhammayn wuxuu Guddoomiyaha weydiisan karaa mid kale, isagoo soo celinaya tii hore. Arrintaasna waa in lagu qoraa diiwaanka.

5. Guddoomiyuhu wuxuu amri karaa in laga fogeeyo goobta codbixiyaasha ula kac ugu raaga codbixinta, iyadoo laga soo celinayo xaashidii la siiyey; hase yeeshee waa in loo oggolaadaa inay codbixiyaan inta taagan marka ay dhammaadaan kaddib.

6. Guddoomiyuhu haddii uu la kulmo qof haysta xaashiyo codbixin oo dheeraad ah ama kuwo ka duwan nooca la isticmaalayo, amaba uu horay u codbixiyey, wuxuu ka qaadayaa xaashiyaha uu haysto, wuxuuna degdeg ugu dhiibayaa Ciidammada Nabadgelyada si loo horgeeyo Maxkamad, looguna qaado dacwad ciqaabeed. Arrintaasna waa in lagu qoraa diiwaanka.

**Qod. 29aad**

**(Saacadaha Codbixinta)**

1. Hawlaha codbixintu waxay soconayaa hal maalin, laga bilaabo 7da aroornimo ilaa 6da fiidnimo.
2. Hase yeeshee Codbixintu waa inay socotaa ilaa iyo inta laga dhammaynayo doortayaasha goobta hor taagan.

**Qod. 30aad**

**(Gabagabada Hawlaha Goobta doorashada)**

Marka la dhammeeyo hawlaha ku xusan qodobbada sare, Guddoomiyuhu wuxuu ku dhaqaaqayaa, hakad la'aan, hawlaha soo socda:

1) Wuxuu ku dhawaaqayaa codbixinta doorashadu inay xiran tahay;

2) Wuxuu xirayaa, ningaxayaana sanaadiiqda codbixinta: ningaxa dushiisa waxaa lagu dhufanayaa shaabadda Goobta doorashada, waxaan saxiixaya Guddoomiyaha iyo xubnaha kale ee Guddiga;

3) Wuxuu hubinayaa diiwaankana ku qorayaa tirada xaashiyaha codbixinta ee la isticmaalay isagoo ka eegaya boolleetayaasha laga jaray jeexyada ku haray;

4) Wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qoraayaa tirada xaashiyaha codbixinta ee looga qaaday codbixiyeyaasha:

a) Iyagoo xumaa ama aan dhammayn awgeed;
b) Iyadoo ay codbixiyeyaashu ula kac ugu raageen codbixinta awgeed;

t) Iyadoo codbixiyeyaasha lagu helay hal xaashi codbixin wax ka badan;

j) Iyadoo codbixiyeyaasha lagu helay xaashiyo codbixin ee aan waafaqsanayn kuwa sharciga ah;

x) Iyadoo la ogaaday inay horay u codbixiyeen;
5) Wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qorayaa tirada xaashiyaha codbixinta ee aan la isticmaalin;

6) Wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qorayaa, isagoo sal ka dhiganaya waxyaabaha kor lagu soo sheegnay, tirada dadka run ahaantii codbixiyey;

7) Wuxuu xirayaa diiwaanka hawlaha Goobta doorashada,

8) Wuxuu daabacyadaas kor ku xusan ku ridayaa kolayada u gaarka ah, kuwaasoo uu u xiraayo una ningaxayo sida ku xusan lambarka 2aad ee qodobkaan;

9) Wuxuu ku ridayaa shaabadda Goobta codbixinta kolayga loogu tala galay; ningaxa dushiisana waxaa la saarayaa saxiixyada ku tilmaaman lambarka 2aad ee qodobkan;

10) Wuxuu kolayada ku ridayaa saxaarad uu xirayo, ningaxayana: ningaxa dushiisa waxaa la saarayaa saxiixyada ku tilmaaman lambarka 2aad;

11) Wuxuu saxaaradda raacinayaa sanaadiiqda codbixinta.

Qod. 31aad
**(Joogista dhammaan xubnaha Guddiga Doorashada ee Goobta)**

Muddada ay socdaan hawlaha goobta doorashadu, dhammaan xubnaha Guddigu waa inay joogaan. Waxaa la oggol yahay maqnaansho gaaban, markiiba hal qof, iyadoo oggolaansho laga haysto Guddoomiyaha Guddiga.

Qod. 32aad
**(Diiwaanka Guddiga doorashada ee Goobta)**

Diiwaaneynta hawlaha Guddiga doorashada ee goobta waa in laga sameeya saddex nuqul oo ay wada saxiixaan dhammaan xubnaha Guddiga doorashada Goobta. Laba nuqul oo ay la socdaan dhammaan lifaaqyada isaga ku xusan waxaa loogu tala galay Guddiga doorashada ee degmada, kan saddexaadna Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada.

**Qod. 33aad**
**(Qaadidda iyo dhiibidda qalabka Goobta)**

Mar alla markay dhammaadaan hawlaha ku tilmaaman qodobbada sare Guddoomiyuhu, isagoo ay la socdaan ugu yaraan xubin ka mid ah Guddiga doorashada ee goobta, ayna ilaalinayaan Ciidammada Nabadgelyadu, wuxuu deg deg u qaadayaa una geynayaa Guddiga doorashada ee degmada saxaaradda ay ku jiraan qalabka ku tilmaaman Qod. 31 iyo sanaadiiqda codbixinta. Marka loo dhiibayo saxaaradda iyo sanaadiiqda, Guddiga doorashada ee degmadu waa inuu hubiyaa dhammida ningaxa, laguna qoraa caddeyn laba nuqul ah oo mid uu qaato Guddoomiyaha Guddiga doorashada ee Goobta, midda kalena Guddiga doorashada ee degmada. Guddoomiyaha Guddiga doorashada ee Goobtu waa inuu isla waqtigaas u dhiibaa Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada hal nuqul oo ah diiwaanka Goobta Doorashada.

## XUBINTA VI
## HAWLAHA GUDDIGA DOORASHADA EE DEGMADA

### Qod. 34aad
### Dhisidda Guddiga doorashada ee degmada

Marka la helo qalabka ku tilmaaman Qod. 17/2, Guddoomiyaha Guddiga doorashada ee Degmadu :

1) Wuxuu ku dhaqaaqayaa dhisidda Guddiga doorashada degmada isagoo ugu yeeraya inay ka soo qayb galaan Kaaliyaasha, Xoghayaha iyo u qaybsayaasha tirada;
2) Markuu xaqiijiyo, tusana xubnaha kale ee Guddiga dhammida ningaxa, wuxuu furayaa saxaaradda, ka soo saarayaa hubinayaana, qalabka ku jira;
3) Markuu xaqiijiyo, tusana xubnaha kale dhammida ningaxa la saaray, wuxuu furayaa kolayga ay ku jirto shaabadda Guddiga, wuxuuna ku qorayaa lambarkeeda diiwaanka;
4) Wuxuu qalabka kale u dhiibayaa Xoghayaha Guddiga doorashada ee Degmada.

Guddiga doorashada ee degmadu wuxuu dhawrayaa in ay soo gaaraan qalabka ku tilmaaman Qod. 33aad

### Qod. 35aad
### (Qabashada qalabka Goobta doorashada)

Qabashada saxaaradaha iyo sanaadiiqda Goobaha doorashada, Guddiga doorashada ee Degmadu wuxuu raacayaa habka ku tilmaaman lambarka 2aad ee Qod. 34aad, iyadoo loo kala hormarinaayo sida loo soo kala horreeyey.

### Qod. 36aad
### (Xiridda Xafiiska Guddiga Doorashada ee Degmada ka dib Marka la qabto qalabka goobaha doorashada)

Xafiiska Guddiga doorashada ee Degmada lama xiri karo ka hor inta aysan soo gaarin ama aysan tirsan dhammaan qalabka Goobaha doorashada ee Degmada.

Inta uu xiran yahay Xafiisku, qofna kuma jiri karo gudi-

hiisa. ilaalintiisana waxaa Guddoomiyuhu u xilsaarayaa Ciidanka Nabadgelyada oo dibadda ka ilaalinaya.

### Qod. 37aad
### (Bilawga hawlaha tirinta)

Hawlaha tirintu waxay bilaabanayaan 8da subaxnimo ee maalinta xigta tan doorashada. Lama bilaabi karo tirinta Goob dorasho inta ay ka dhammaanayaan hawlaha midda markaas faraha lagula jiro. Inta aan la bilaabin tirinta Goob doorasho, Guddoomiyuhu wuxuu furayaa saxaaradda, isagoo hubinaya dhammida ningaxa; wuxuu kaloo hubinayaa dhammida ningaxyada kolayada saxaaradda ku jira iyo kuwa sanaadiiqda codbixinta.

Guddoomiyuhu ka dib markuu cod dheer ku sheego lambarka u gaarka ah goobta doorashada iyo meesha ay ku tiil, wuxuu kolayga ka soo saarayaa diiwaankii Goobtaas, wuxuuna cod dheer ku sheegayaa tirada dadka dhab ahaan ka codbixiyey Goobta sida ku cad isla diiwaankaas.

### Qod. 38aad
### (Kala Shaandheynta Xaashiyaha Codbixinta)

1. Marka ay dhammaadaan hawlaha ku xusan qodobka hore, Guddoomiyuhu, kaddib marka uu ka gooyo ningaxa, wuxuu furayaa sanaadiiqda buluugga ah oo ay ku jiraan xaashiyaha codbixinta ee oggolaaday liisaska musharrixiinta.

2. Wuxuu ku dhaqaaqayaa hubinta iyo tirinta kuwa oggol musharrixiinta iyadoo midba mar la soo qaadayo, lagulana dhawaaqayo cod dheer tirada guud oo ay gaaraan xaashiyaha codbixinta ee oggolka ah. Hawlahaas ka dib, xaashiyaha ansaxa ah waxaa lagu celinayaa sanaadiiqdoodii kuwa aan ansaxa ahaynna waxaa lagu ridayaa koley gaar ah.

3. Ka dib marka uu kaga gooyo ningaxa Guddiga hortiisa. Guddoomiyhu wuxuu furayaa sanaadiiqda Hurdiga ah oo ay ku jiraan xaashiyaha codbixinta ee diiday musharrixiinta iyadoo la raacayo habka ku xu-

san lambarka hore.

4. Xaashiyaha codbixinta waxaa taaban kara oo keliya xubnaha Guddiga.

**Qod. 39aad**
**(Xaashiyaha Codbixinta ee aan ansaxa ahayn)**

Waxaan ansax ahayn xaashiyaha codbixinta oo ay ka maqan yihiin shaabadda Goobta doorashada iyo kuwa ay ku yaalliin saxiix, magac, ama calaamado kale ee uu gacantiisa ku qoray codbixiyuhu.

**Qod. 40aad**
**(Wada joogista dhammaan Xubnaha Guddiga)**

Muddada ay socdaan hawlaha tirinta xaashiyaha codbixinta, dhammaan xubnaha Guddiga doorashada ee Degmadu waa inay wada joogaan.

Waxaa laysu oggolyahay maqnaansho gaaban, oo sabab laga garaabi karo leh, markiiba hal qof, iyadoo oggolaasho laga haysto Guddoomiyaha.

**Qod. 41aad**
**(Baarista Cabshada iyo Go'aannada)**

Marka ay dhammaadaan hawlaha kala shaandheynta xaashiyaha codbixinta, Guddiga doorashada ee degmadu wuxuu baarayaa wixii cabasho ah ee la xiriira doorashada oo ku soo gaaray si qoraal ah inta ay socotay doorashadu iyo kaddibba, wuxuuna Guddigu go'aan kaga gaarayaa cod hal dheeri ah.

**Qod. 42aad**
**(Hubinta natiijada Goobta Doorashada)**

Marka ay dhammaadaan hawlaha ku xusan qodobbada hore, Guddoomiyaha G. Doorashada ee Degmadu wuxuu:

1) xaqiijinayaa wixii iskhilaaf ah ee u dhexeeya tirada u soo baxday Guddiga doorashada ee Degmada iyo tan ku qorana diiwaanka Guddiga Doorashada ee Goobta, isagoo muujinaya, haddii ay jiraan sababaha keenay;

2) kula dhawaaqayaa cod dheer tirada guud ee codbixi-yeyaasha, xaashiyaha codbixinta ee ansaxay iyo kuwa aan ansaxin;

3) kula dhawaaqayaa cod dheer natiijada doorashada isagoo kala sheegaya tirada codadka oggolaaday iyo inta diiday;

4) ku qorayaa arrimaha kor ku xusan oo idil diiwaanka Guddiga doorashada ee Degmada.

**Qod. 43aad**
**(Dib u dhigidda kala shaandheynta)**

Hawlaha la xiriira kala shaandheynta xaashiyaha codbixin-ta ee Goobta, mar haddii la bilaabo waa in la dhammaystiraa iyadoo aan la kala joojin.

Haddii hawlaha Guddiga lagu dhammaystiri kari waayo maalintaas gudaheeda, Guddoomiyuhu wuxuu dib ugu dhiga-yaa 8:00 subaxnimo ee maalinta xigta.

**Qod. 44aad**
**(Isugeynta Natiijada doorashada)**

Marka la dhammeeyo hawlaha kor ku xusan, Guddoomiyu-hu wuxuu:

1) tirinayaa guud ahaan inta ka codbixisay dhammaan goobaha doorashada ee Degmadu u qaybsan tahay, xaashiyaha codbixinta ee ansaxay, kuwa aan ansaxin, codadka oggolaaday, iyo kuwa diiday musharrixiinta.
2) ku caddeynayaa cod dheer natiijada ku meel gaarka ah ee ka soo baxday Degmada, isagoo u kala saarayaa tirada oggolaatay iyo tirada diiday;

3) ku ogeysiinayaa natiijadaas, taar ku qoran lambar iyo farba, Guddiga dhexe oo doorashada.

4) ka buuxinayaa diiwaan saddex nuqul ah hawlaha laga qabtay G. doorashada ee degmada iyo natiijada ka soo baxday iyadoo ay wada saxiixayaan dhammaan xubnaha Guddigu. Nuqullada diiwaankaas waxaa loo

qaybinayaa sida ku xusan Qod. 45aad, lambarka 2aad xarafka (a) ee sharciga.

**Qod. 45aad**
**(Xiritaanka hawlaha Guddiga doorashada ee Degmada)**

1. Markii la dhammeeyo hawlaha kor ku tilmaaman, Guddoomiyaha Guddiga doorashada ee Degmadu wuxuu:

a) u dirayaa Guddiga dhexe ee doorashada nuqulka koowaad ee diiwaanka ku xusan qod. 44aad iyadoo ay la socdaan nuqullada koowaad ee dhammaan diiwaannada guddiyada doorashada ee goobaha degmadu u qaybsan tahay iyo wixii cabasho qoraal ah ee soo gaaray intii ay socdeen hawluhu;

b) U dirayaa Guddiga Qaranka ee doorashada nuqulka labaad ee diiwaanka ku tilmaaman qod. 44aad.

2. Qalabka intiisa kala oo ay la jiraan nuqullada saddexaad ee diiwaannada ku tilmaaman qodobka 44aad waxaa loo gudbinayaa Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee degmada isagoo reebanayo caddeyn.

**Xubinta VII**
**Hawlaha Guddiga Dhexe ee doorashada**

**Qod. 46aad**
**(Dhismaha Guddiga Dhexe ee doorashada)**

1. Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee doorashadu kaddib markuu helo qalabka ku tilmaaman qod. 17/6 wuxuu ku dhaqaaqayaa:

a) dhisidda Guddiga, isagoo ugu yeeraya inay ka soo qayb galaan Guddoomiye ku xigeenka, Kaaliyayaasha, Xoghayaha iyo ku qaybsanayaasha tirada;

b) kaddib markuu arko tusana xubnaha kale dhammida ningaxa la saaray, wuxuu furayaa saxaaradda, kana soo saarayaa qalabka ku jira;

t) kaddib markuu arko tusana xubnaha kale dhammida ningaxa la saaray, wuxuu furayaa koleyga ay ku jirto shaabada Guddiga, lambarkeedana ku qoraya diiwaanka;

j) u gudbinaya qalabka intiisa kale Xoghayaha.

2. Guddiga dhexe ee doorashadu markaas kaddib wuxuu sugayaa helitaanka diiwaannada ku xusan qodobka 45aad oo ka soo gaaraya Guddiyada doorashada ee Degmooyinka.

**Qod. 47aad**

**(Ku dhawaaqidda natiijada doorashada Golaha Shacbiga** iyo Golayaasha Shacbiga ee Degaanka).

1. Kaddib markuu helo diiwaannada guddiyada doorashada ee degmooyinka oo idil, Guddoomiyaha Guddiga dhexe ee doorashadu wuxuu ku dhaqaaqayaa hawlaha soo socda:

b) Wuxuu go'aan ka gaarayaa cabashooyinka laga soo qaatay habka codbixinta iyo tirinta;

t) Tirinayaa guud ahaan codadka ansaxa ah, kuwa aan ansaxa ahayn, codadka oggolaaday iyo kuwa diiday liisaska musharrixiinta Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee Degaanka.

2. Kaddib, Guddoomiyaha Guddigu wuxuu ku dhawaaqayaa natiijada kama dambeysta ah ee doorashada iyadoo dadweynaha loo akhrinaayo diiwaanka hawlahaas.

Qodii 48aad

**(Diiwaanka Hawlaha Guddiga Dhexe ee Doorashada)**

1. Diiwaanka hawlaha Guddiga Dhexe ee doorashada waxaa laga sameynayaa 2 nuqul oo kan koowaad loo diraayo Madaxweynaha Jamhuuriyadda.

2. Qalabka inta soo harta oo uu ku jiro nuqulka labaad ee diiwaanka waxaa lagu wareejinayaa Guddiga Qaranka ee doorashada, waxaana lagala harayaa caddeyn.

**Qod. 49aad**
**(Faafinta natiijada doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee Degaanka)**

Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee doorashadu waa in uu ku soo saaraa Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqradiga ee Soomaaliya, shan maalmood gudahood laga bilaabo maalinta ku dhawaaqidda natiijada kama dambeysta ah ee doorashada, magacyada xildhibaannada loo doortay Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee degaannada.

## XUBINTA VII
## Qodobbo kala duwan

**Qod. 50aad**

1) Xildhibaan kasta ee la doorto, marka uu xilka xildhibaannimada bilaabayo wuxuu Guddoomiyaha Golaha Shacbiga hortiisa ku marayaa dhaarta ku xusan Qod. 73/2 ee Dastuurka.

2) Sidoo kale xubinta Golaha Shacbiga ee Dagaanku, markuu bilaabayo xilkiisa, wuxuu marayaa dhaarta soo socota :

**«Waxaan magaca Ilaahay ku marayaa in aan dhawro Dastuurka iyo shuruucda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, *in* aan fuliyo xeerka iyo Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliya, in aan hirgeliyo mabaadi'da Hantiwadaagga, in aan daacadnimo ugu adeego danaha Qaranka Soomaaliyeed.»**

**Qod. 51aad**
**(Bannaanaasho Kursi)**

1) Haddii ay timaado sabab xildhibaanka Golaha Shacbiga ka wareejisa xilka xildhibaannimada, waxaa beddelkiisa gelaya musharaxa ugu horreeya liiska kaydka.
2) Ka mid noqoshada Golaha Shacbiga ee Xildhibaankaas waxaa ku dhawaaqaya Guddoomiyaha Golaha Shacbiga.

Jagada xubinnimada Golaha Shacbiga degaanka ee sabab kasta ku bannaanta waxaa qabanaya mushraxa ugu horreeya liiska keydka ee Golaha Shacbiga ee degaanka, arrintaasna waxaa ku dhawaaqaya Guddoomiyaha Golaha Shacbiga ee degaanka.

## Xubinta IX
## Ciqaabaad

### Qod. 52aad
### (Ishortaagid bandhigidda doorashooyinka)

Qof kastoo dariqad kasta ku hor istaaga ama carqaladeeya shir bandhig doorasho, ama ishortaaga meel ku dhejin halkudhegyo la xiriira doorashooyinka, waxaa lagu ciqaabaya xabsi ilaa Saddex sano ah ama ganaax ilaa 3.000 shilin ah.

### Qod. 53aad
### (Ku xadgudub xoriyadda doorashada)

1) Qof kasta oo isagoo ballanqaadaya ama siinaaya lacag, wax qiimo ama waxtar gaar ahaaneed leh, ama u ballanqaada ama siiya shaqo dawladeed ama mid gaar ahaaneed, ama holliya xorriyadda doorashada waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa 3 sannadood ama ganaax ilaa 3.000 shilin.

3) Qofkii si uu ku gaaro ujeeddooyinka kor ku xusan isticmaala xoog, handadaad, khiyaamo ama indhasarcaadis, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 4 sano iyo ganaax ilaa 4800 shilin.

### Qod. 54aad
### (Ishortaagid habsami u socoshada)
### Hawlaha codbixinta iyo kala shaandhaynta)

Qof kasta oo isagoo isticmaalaya handadaad ama falal xoog ah, ishortaaga madax bannaani u baxsashada codka ama carqaladeeya habsami u socoshada hawlaha doorashooyinka, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa 4 sano ama ganaax ilaa 4800 Shilin.

**Qod. 55aad**

**(Idan la'aan ku soo gelid goobaha iyo xafiiska doorashada)**

Qof kasta oo, isagoon xaq u lahayn, inta ay socdaan hawlaha doorashadu soo gala goobaha ama xafiisyada doorashada ama ku hakada, inkasta oo laga dalbay inuu iskaga baxo, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa hal bil ama ganaax ilaa 100 shilin.

**Qod. 56aad**

**(Cod bixin xad gudub ah)**

1) Qof kasta oo, isagoo ogsoon in uusan xaq u lahayn cod bixin ama isagoo sheeganaaya magac qof kale, cod bixin u yimaada, ama bixiya hal cod wax ka badan, amase isagoo u xil saaran inuu u cod bixiyo ruux aan qof ahaan cod baxsan karin ugu cod bixiyo si ka duwan sidii la faray, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa 2 sano ama ganaax ilaa 2400/ shilin.

2) Isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya qofkii si been ah ugu marag kaca aqoonsiga qofka cod bixinaaya, ama laga helo isagoo haysta xaashiyo cod bixin ee ka duwan kuwa sharciga ah.

**Qod. 57aad**

**(Been abuurid, xadid qoraallo ama wax ka beddelid xisaabaadka doorashada)**

1) Haddii uusan falku dembi ka weyn keeneyn, qof kasta oo been abuura xaashiyaha cod bixinta ama warqado kale oo la xiriira hawlaha doorashada, ama wax ka beddela, xada ama jeejecxa qayb ama gebi ahaan warqadahaas midkood, amase ogaan u isticmaala warqadahaas beenta ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa 2 sano ama gannaax ilaa 2400/ shilin.

2) Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaaya qofkii si kastaba wax uga beddela natiijada doorashada.

**Qod. 58aad**
**(Diidid sabab la'aan xubin ka noqosho Guddiyada doorashada)**

Qof kasta oo, isagoo loo magacaabay xilka xubinnimada Guddiyada doorashada, sabab la'aan diida xilkaas ama ka maqnaada fadhiyada Guddiga, ama isaga taga, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 1 sano oo xarig ama ganaax ilaa 2.000 shilin.

**Qod. 59aad**
**(Xadgudubyo kale *oo* l*oo* geysto sharciga doorashada)**

Qof kasta oo jabiya awaamiirta sharcigaan ku xusan, ciqaab gaar ah haddii aan loogu tala gelin, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 6 bilood ama ganaax ilaa 1.000 shilin.

**Qod. 60aad**
**(Dhumid xaqa doorashada)**

1) Muwaadin kasta oo gala denbiyada ku xusan sharcigan, laguna xukumo xarig aan ka yarayn 2 sano, waxaa ka lumaaya xaqa doorashadda muddo shan sano ah.
2) Dacwaddaha la xiriira denbiyada sharcigan ku xusan waxaa loo qaadayaa si degdeg ah, waxaana awood u leh Maxkamadaha caadiga ah.

**Madaxa X**
**Qodobo kala guur ah**

**Qod. 61aad**
**(Awood soo saarid Xeer)**

Madaxweynaha JDS wuxuu soo saari karaa Xeer nidaamiye lagu fuliyo Sharcigan.

**Qod. 62aad**
**(Karmeerka Xoghayaha Guddigu Xisbiga ee Gobolka iyo kan Degmada)**

Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolku wuxuu kormeerayaa si toos ahna u xaqiijinayaa in hawlaha doorashada ee Gobolku ku dhammaadaan muddadii iyo habkii loo dejiyey. Isla xilkaas oo kale ee heer degmo wuxuu saaran yahay Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada.

**Qod. 63aad**
**(Masuuliyadda Ciidammada Nabadgelyada)**

Nabadgelyada iyo xasilloonida socodka hawlaha doorashada waxaa ka mas'uul ah Ciidammada Nabadgelyada iyagoo raacaya awaamiirta iyo tusaalooyinka Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga ee Gobollada iyo Degmooyinka iyo Guddoomiyayaasha Guddiyada doorashada.

**Qod. 64aad**
**(Dacwooyinka Idaariga ah)**

Go'aannada kama danbeysta ah ee Guddiga Dhexe ee doorashada waxaa dacwo idaari ah looga qaadan karaa Maxkamada Sare 15 maalmood gudahood laga billaabo maalinta la soo saaro go'aanka.

**Qod. 65aad**
**(dhaqan gal)**

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu baahinayaa Faafin Rasmiga ah.

**MADAXWEYNAHA J.D.S.**
**(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)**

## LIFAAQA SHARCIGA L. 43 EE 1.12.1979

### TIRADA XUBNAHA GOLAYAASHA SHACBIGA EE DEGAANNADA.

### I GOBOLKA JUBBADA HOOSE

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Kismaayo | 21 | Xubnood |
| » | » | » | » | Jamaame | 21 | » |
| » | » | » | » | Afmadoow | 13 | » |
| » | » | » | » | Badhaadhe | 13 | » |

### II GOBOLKA BAY

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Baydhaba | 21 | » |
| » | » | » | » | Buur Hakaba | 13 | » |
| » | » | » | » | Diinsoor | 13 | » |
| » | » | » | » | Qansax Dheere | 13 | » |

### III GOBOLKA BAKOOL

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Xudur | 21 | » |
| » | » | » | » | Waajid | 13 | » |
| » | » | » | » | Yeed | 13 | » |
| » | » | » | » | Ceel Berde | 13 | » |
| » | » | » | » | Tiyeeglow | 13 | » |

### IV GOBOLKA GEDO

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Garba-haarey | 21 | » |
| » | » | » | » | Luuq | 13 | » |
| » | » | » | » | Baardheere | 21 | » |
| » | » | » | » | Doolow | 13 | » |
| » | » | » | » | Beled-Xaawo | 13 | » |
| » | » | » | » | Ceel Waaq | 13 | » |

### V GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Marka | 21 | » |
| » | » | » | » | Qoryooley | 21 | » |
| » | » | » | » | Afgooye | 21 | » |
| » | » | » | » | Wanla Weyn | 13 | » |
| » | » | » | » | Baraawe | 13 | » |

## VI GOBOLKA SHABEELAHA DHEXE

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Jowhar | 21 | Xubnood |
| » | » | » | » | Balcad | 21 | » |
| » | » | » | » | Aadan Yabaal | 13 | » |
| » | » | » | » | Cadale | 13 | » |

## VII GOBOLKA HIIRAAN

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Beled Weyne | 21 | » |
| » | » | » | » | Buula Berde | 13 | » |
| » | » | » | » | Jalalaqsi | 13 | » |

## VIII GOBOLKA GALGUDUUD

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Dhuusa Mareeb | 21 | » |
| » | » | » | » | Ceel Dheer | 13 | » |
| » | » | » | » | Ceel Buur | 13 | » |
| » | » | » | » | Cabuudwaaq | 13 | » |
| » | » | » | » | Cadaado | 13 | » |

## IX GOBOLKA MUDUG

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Gaalkacyo | 21 | » |
| » | » | » | » | Xarardheere | 13 | » |
| » | » | » | » | Hobyo | 13 | » |
| » | » | » | » | Jarriiban | 13 | » |
| » | » | » | » | Galdogob | 13 | » |

## X GOBOLKA NUGAAL

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Garoowe | 21 | » |
| » | » | » | » | Eyl | 13 | » |
| » | » | » | » | Laascaanood | 13 | » |
| » | » | » | » | Taleex | 13 | » |

**II**

## XI GOBOLKA BARI

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Boosaaso | 21 | Xubnood |
| » | » | » | » | Qardho | 13 | » |
| » | » | » | » | Bandar Beyla | 13 | » |
| » | » | » | » | Iskushuban | 13 | » |
| » | » | » | » | Caluula | 13 | » |
| » | » | » | » | Qandala | 13 | » |

## XII GOBOLKA SANAAG

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Ceerigaabo | 21 | » |
| » | » | » | » | Badhan | 13 | » |
| » | » | » | » | Ceel Afweyne | 13 | » |

## XIII GOBOLKA TOGDHEER

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Burco | 21 | » |
| » | » | » | » | Oodweyne | 13 | » |
| » | » | » | » | Buuhoodle | 13 | » |
| » | » | » | » | Sheekh | 13 | » |

## XIV GOBOLKA WOQOOYI GALBEED

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Hargeysa | 21 | » |
| » | » | » | » | Berbera | 21 | » |
| » | » | » | » | Gabiley | 21 | » |
| » | » | » | » | Booraame | 21 | » |
| » | » | » | » | Seylac | 13 | » |
| » | » | » | » | Lug-Haye | 13 | » |

## XV GOBOLKA JUBADA DHEXE

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Golaha | Shacbiga | ee | Degaanka | Bu'aale | 21 | » |
| » | » | » | » | Jilib | 21 | » |
| » | » | » | » | Saakow | 13 | » |

## XVI GOBOLKA BANAADIR

| | | |
|---|---|---|
| Galaha Shacbiga ee Magaalada Xamar | 35 | » |

III